

Qorshaha magaalada Oulu ee sinnaanta iyo caddaaladda ee sannadada 2022-26

HORDHAC

Qoraalkan waa qorshaha sharciga waafaqsan ee sinnaanta iyo caddaalada ee Magaalada Oulu oo shaqaynaya sannadada 2022-2026. Qorshaha ujjeedadiisu waxa weeyaan in uu ahaado qalab lagu shaqeeyo oo lagu hago horumarka adeegyada magaalada iyo waxqabadka khuseeya sinnaanta iyo caddaaladda. Horumarinta qorshaha sinnaanta iyo caddaaladdu waa muhiim waayo wuxuu soo saaraa nololwanaag wuxuuna suurogaliyaa hirgalinta xuquuqda aadamaha.

Qorshaha waxqabadka leh ee sinnaanta iyo caddaaladdu waa qorshe gaar ah oo ku salleysan qorshaha khuseeya shaqaalaha magaalada Oulu, oo isagana loo cusboonaysiiyay sannaddada 2022-26.

Badanaa marka ay dadku ka hadlayaan sinnaanta iyo caddaaladda waa labo eray oo iskaga qasma. Shaqada qorsheyntase muhiim ayaay u tahay in weedhahaas si faahfaahsan loo qeexo si marka la qiimeynayo iyo marka la qorsheynayo waxqabadka magaalada diiradda si gaar ah loo saaro arrimaha muhiimka ah.

Sinnaanta macnahaheedu waxa weeyaan ta ka dhaxeysa jinsiyada ee xambaarsan ahaanshaha qofka jinsigiisa ku saabsan taas oo ah khibradda iyo muujinta qof kasta u gaarka ah ee jinsigiisa uu ku muujinayo labiskiisa, habdhaqankiisa ama waxyaabaha kale ee la midka ah.

Caddaaladda macnahaheedu waxa weeyaan in dadka si isku mid ah oo caddaalad ay ku jирто loola dhaqmo iyadoo anan loo eegayn qofka da'diisa, meesha uu ka soo jeedo, afkiisa, diintiisa, mowqifkiisa, ra'yigiisa, waxqabadkiisa siyaasadeed, ururka xirfadeed ee uu ku jiro, xiriirkiisa qoyseed, caafimaadkiisa, naafonimadiisa, jinsiga uu jeclaysto ama waxyaabaha kale ee qofka la xidhiidha.

Sharcigu wuxuu waajib uga dhigayaa degmooyinka in ay horumariyaan sinnaanta iyo caddaaladda iyo inay kahor tagaan takoorka. Sannaddadii hore waxaa soo baxay kalmadaha la xiriira takoorka oo ah intersekshonaaliti ama takoorka noocyada badan, taas oo ay macnahaheedu tahay in uu qofku ka mid yahay noocyo badan oo dadka laga tirada badanyahay ah sidaasna lagu takooro. Aragtidaas magaalada Oulu xataa waa mid ay xoogga ku saarayaan waxqabadkooda.

Qorshaha waxaa xiriir ku leh istratejiyadda magaalada Oulu , qiimeyn ta maaliyadda iyo qordhaha maaliyadda, qorshaha maamulka furan, qorsheyaasha isla falgalka iyo kooxaha baahida gaarka ah barnaamijyadood iyo qorsheyaashooda sinnaanta iyo caddaaladda horumarinaya. Nidaamyada qorshaha lagu dajjinayay waxaa ka mid ahaa in laga faa'idaysto khubarada, wayddiimada, tababarada iyo wadashaqaynta kooxaha shaqada.

Qoraalkan qorshaha ah waxaa marka hore lagu bandhigayaa dhibaatooyinka wakhtigan ka jira sinnaanta iyo caddaaladda. Marka xigta waxaan fiirinaynaa sida sharciga, hagitaanada kala duwan iyo heshiisyada kala duwan ay u hagaan shaqada sinnaanta iyo caddaaladda

magaalada Oulu. Markaas kaddib waxaan fiirinaynaa waraaqaha magaalada Oulu iyo waxqabadkeeda waxaanan bandhigaynaa sinnaanta waxqabadka ku sallaysan iyo caddaaladda dadyowga iyo haa'yadaha ka shaqeeya. Qorshahan dhammaadkiisa waxaa lagu soo koobay hagitaano qorsheynta noocyada kala duwan ee shaqada qorsheynta, hababka sinnaanta iyo caddaaladda loo siyaadin karo, eraybixinadda iyo qoraalka xigashada.

Qorshaha waxaa udub dhexaad u ah waxqabadyada magaalada Oulu, xarumaha ganacsiga, shirkada saamileyda qosheyaashooda, ee waxqabadyada kala duwan ay ugu suuro gashay inay qiimeeyaan oo ay u dajiyaa hiigsyo iyo waxqabadyo. Magaalada Oulu waxaay sameysay doorasho ah inay dajjisan karto hiigsyo lagu gaadhayo hiigsiyada sinnaanta iyo caddaaladda lagu horumarinayo. Taas waxaay suuro galinaysaa in waxqabad wax ku ool ah la dajjiyo oo fiiro gaar ah loo yeesho noocyada kala duwan ee shaqada. I tus waxqabadyada kala duwan qorshayaashooda lagu taxay qoraalka Lifaqa 1: *Waxqabadyada kala duwan qorshayaashooda taxan*.

Sida ay yihin shaqooyinka dadka khuseeya oo dhan, sinnaanta iyo caddaaladdu waa shaqo anshax xooggan ku salleysan. Si kastaba waxqabadyada lagaga hor tago ama lagu wanaajiyo kulamada maalinlaha ah waa waxyaabo fudud oo nolosha maalinlaha ah ka soo baxa. Fursadaha iyo xuquuqyadu waxaay khuseeyaan dhammaan dadka magaalada deggan meesha ay rabaan haka soo jeedaan. Sababtaas ayaay magaalada sinnaanta iyo caddaaladda leh fiiro gaar ah ugu yeelataa baahiyaha dadka ku nool.